

**Wax ka bedelka dalabka daawo qoris ku celcelis ah  
Tilmaan-bixiye bukaanada loogu tallogalay**



## Maxay wax laga bedelayaa?

**Hey'dda Caafimaadka ee NHS-ta Liverpool wax bay ka bedeleysaa habka daawooyinka joogtada ah loo dalbado.**

Dadka qaar baa u baahan qaadashada daawooyin joogto ah oo xaalad caafimaad lagu daaweeyo.



Goor kasta oo aad daawo saa'id ah u baahataba waa in uu GP-gaagu OK yirahdaa oo uu ogolaadaa.

Dadka qaar baa GP-gooda u aada si toos ah ugana dalbada daawooyinkooda xiga.



Dad kalena farmashiyaha ayey aadaan si dawooyinkooda xiga GP-gooda loogaga dalbo.

Laga bilaabo Kuleylaha (summer-ka) 2018, farmashiyeyaasha ma sii awoodi doonaan inay dadka GP-yadooda doowooyin uga dalbaan. Waxa ay ahaan doontaa in uu qof walba isaga GP-giisa ka dalbado daawooyinkiisa xiga.



Farmashiyeyasha weli waa ay awoodi doonaan in ay daawooyinka GP-ga kaaga soo qaadaan gurigana kuugu keenaan – laakiin adigaa lagaa rabi doontaa in aad marka hore daawooyinkaaga xiga GP-ga si toos ah uga dalbato.

## Maxaa xiga oo ay tahay in aan sameeyo?

Haddii aad si toos ah GP-gaaga uga dalban jirtey daawada xigta goor kasta oo aad u baahan tahayba, ma jiraan wax aad bedeleyso umana baahnid wax kale sameyn.

Laakiin haddii uu farmashistahaagu kugu caawiyo dalabka daawooyinkaaga, waxa aad u baahaneysaa in aad sida ugu dhaqsiyaha badan ee aad awoodo GP-gaaga u la hadashid aadna caawinaad weydiisatid.



**Fadlan ha sugin ilaa aad ku dhawaato inay daawooyinka kaa dhamaadaan, iyagaas la hadal marka ay weli kuu harsan tahay daawo hal toddobaad qaadan karto.**

Haddii aadan arrinta hubin, fadlan qofka qeybta soo dhaweynta GP-gaaga jooga wax weydii. Inay ku kaalmeeyaan baa iyagaas farxad gelin doonta.